

Iska-tallaal influensada/hargabka - Skåne

Xilliga dayrta iyo qaboobaha kasta waxaa dalka Iswiidan ka dilaaca cudurka influensada/hargabka. Influensada/hargabka hab dhaqsi badan ayay dadka isqaadsiyaan. Qaar iyaga kamid ah hab halis ayay ugu xannuunsadaan. Sidaas awgeed, waxaa fiican in influensada/hargabka sannada kasta layska tallaalo.

Influensada/hargabka waxaa sababa fayruus. Calaamadaha influensada/hargabka waxaa tusaale ka mid ah qandho, madax-xannuun iyo dhuun-xannuun.

Haddii influensada/hargabka iska tallaasho waad ka badbaadi doontaa dhibaatiisa. Dad badan maba ku xannuunsadaan. Kuwa ku dhacana influensada/hargabka badi ahaan sidaas uguma xannuunsadaan.

Tallaalka influensada sannooyin aad u badan ayaa la isticmaali jiray, waxaana laga isticmaala adduunka oo idil. Sidaas awgeed waa tallaal sugan oo kalsooni lagu qabo.

Iska-tallaal haddii aad ka tirsan tahay kooxaha hab halis ah ugu xannuunsada

Dadyowga badidooda si fiican ayay influensada/hargabka ugu bogsadaan, mana u baahna in ay iska iska-tallaalaan. Haseyeeshe, dadyowga qaarkood hab halis ah ayay ugu xannuunsadaan. Sida tusaale, haddii cudurro kale ay qabaan. Sidaas awgeed ,waa in sannad kasta ay iska-tallaalaan.

Haddii kooxaha hoos ku xusan aad ka tirsan tahay waxaa lagula talinayaa inaad fursadda is-tallaalida ka faa'iidayso:

- Haddii da'daada ay tahay laba iyo lexdan sano ama aad ka wayn tahay.
- Haddii aad uur leedahay oona lex iyo toddban toddobaad ay ka soo wareegatay.
- Haddii aad wadne-xannuun qabto. Sida tusaale hab-shaqaynta wadnaha u hooseeyo.
- Haddii aad sanbaba-xannuun qabto. Sida tusaale cudurka sanbabada ee raaga ee [KOL] loo yaqaanno ama neefta oo ah nooca dhib badan.
- Haddii aad cudurka sonkorowga nooca 1-aad ama 2-aad qabto.
- Haddii aad qabto cudur ama lagugu daryeelo dawo oo saamayn aad u xun ku yeelato awoodda difaaca jirka.
- Haddii hab-shaqaynta kiliyaha ay aad u hooseeyaan, taasoo kiliyahaaga aynan si fiican hawlahooda u qabanayn.
- Haddii hab-shaqaynta beerka ay aad u hooseeyso, taasoo beerkaaga usan si fiican hawshiisa u qabanayn.
- Haddii aad u cayilan tahay.
- Haddii aad qabto cudurka dareen-wadeyaasha murqaha, kaasoo saamayn ku yeesha awoodda neefsashada. Cudurka dareen-wadeyaasha murqaha wuxuu hoos u dhiga tayada hab-shaqaynta murqaha jirka.
- Haddii aad la dhiban tahay dhawr nooc oo itaaldarro ah.

Haddii xaaladaada aad hubin waydii dhakhtarkaaga

Ma leedahay cudur kaasoo aadan hubin inaad aad ugu xannuunsan karto haddii hargabku u kugu dhaco? Xaaladdaas ka hubso dhakhtarkaaga.

Sidii aad qof kale u badbaadiso awgeed iska-tallaal influensada/hargabka

Sidii aad qof kale u badbaadiso awgeed waxaa xaaladaha qaarkood fiican inaad i influensada/hargabka iska-tallaasho.

Waa kuwan tusaalaha xaaladaha:

- Haddii aad la nooshahay qof heerka difaaca jirkiiisa u hooseeyo.
- Haddii aad daryeesho qof heerka difaaca jirkiiisa oo aad u hooseeyo.

Sannad kasta waxaad iska-tallaali kartaa rugta daryeel-caafimaadeedka ee aad ka tirsan tahay

Haddii aad ku talo jirto inaad influensada/hargabka iska tallaasho khadka taleefanka kula xiriir rugta daryeel-caafimaadeedka ee aad ka tirsan tahay.

Waxaa is-tallaali kartaa laga bilaabo markii taariikhda ay ku beegan tahay:

- 3 nofeembar waa haddii aad halis ugu jirto in influensada/hargabka aad ugu xannuunsato. Xaaladdaas tallaalka waa lacag la'aan.

Waxtarka tallaalka wuxuu bilaabanayaa ilaa laba toddobaad kaddib.

Is-tallaal sannad kasta

Sidaa aad ugu badbaado influensada/hargabka waa in sannad kasta iska tallaasha. Waxtarka maaddada tallaalka waa hal sano. Fayruuska sababa influensada/hargabka sannadka kasta ayuu is-beddela. Maadaama ay sidaasi tahay tallaalkii sannadka hore waxba kuma tarayo. Sidaas awgeed, waa inaad sannad kasta is-tallaalsha. Haddii kale wax badbaado ah influensada/hargabka kama haysatid.